



FIIRO GAAR AH KIRAYSTAYAASHA BOSTON!

Baro sharciga cusub ee ku saabsan Khidmadaha Dillaalka

Laga bilaabo Agoosto 1, sharciga Massachusetts wuxuu sheegayaa in “kharash kasta uu bixin karo keliya qofka, ha ahaado mulkiilaha ama kiraystaha, ee si toos ah u kireystay oo heshiis la galay wakiilka ama iibiyaha rukhsadda haysta.”

Tani waxay ka dhigan tahay:

- Haddii mulkiilaha guriga uu qortay dillaalka, isagaa bixinaya kharashka.
- Haddii adigu aad qortay dillaalka oo aad saxiixday heshiis, adigaa bixinaya kharashka.
- Qofna kuguma qasbi karo inaad bixiso kharashka ilaa aad ogolaato adigoo qoraal ku caddeeyay.

Waa inaad mar walba:

- Weydii nuqul ka mid ah heshiiska aad saxiixdo.
- Heshiis kasta ka hel si qoraal ah.
- Xafid diiwaanada.

Haddii lagu weydiiyo inaad bixiso khidmad aan caddaalad ahayn ama aad u baahan tahay caawimo, la xiriir Office of Housing Stability (Xafiiska Deganaanshaha Guriyeynta).



boston.gov/housingstability



617-635-4200



housingstability@boston.gov

